



**SOMALI NATIONAL  
BUREAU OF STATISTICS**  
Federal Republic of Somalia

# TUSAHA SICIRKA BADEECADAHA AGOOSTO 2024



## Warbixin kooban

Dhammaan qeybaha Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) bishii Agoosto 2024 ayaa gaaray 151.04, marka la barbardhigo 152.92 bishii Juulay 2023.

Isbedel bileedka, Agoosto 2024, marka la barbar dhigo Juulay 2024, ayaa hoos u dhacay -1.23 boqolkiiba. Sare u kaca ugu badan ee billaha ahi ayaa ahaa qiimaha **Dharka iyo Kabaha** 3.40 boqolkiiba. Qiimaha kororka **Dharka iyo Kabaha** ayaa ka yimid sare u kaca qiimaha **Dharka** +4.15 boqolkiiba.

Guud ahaan, sicir bararka 12kii bilood ee la soo dhaafay Agoosto 2023 iyo Agoosto 2024 (heerka sicir bararka), dhammaan qeybaha TSB ayaa sare u kacay 5.93 boqolkiiba, marka la barbardhigo 5.54 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay Juulay 2023 iyo Juulay 2024.

### Shaxda 1: Tusaha Sicirka Badeecadaha; Agoosto 2024 (Dec 2014 = 100)


Tusaha Sicirka Badeecadaha, Agoosto 2024	
Tusaha bishan (Agoosto 2024)	151.04
Tusaha bishii hore (Juulay 2023)	152.92
Tusaha sanadkii hore (Agoosto 2023)	142.58
Isbedelka bilaha ah boqolkiiba %	-1.23%
Isbedelka heerka sicir bararka sanadlaha ah boqolkiiba %	5.93%

### Heerka sicir bararka marka loo eego TSB-da

Isbedelka boqoleyda ee 12 bilood

### Tixraca TSB-da

Index = 100 @ December 2014



Isha Xogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Agoosto 2024** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Agaasinka <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS\_somalia

## Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) Agoosto 2024

### Guud ahaan heerka Sicir Bararka: Dhammaan Qeybaha TSB, Agoosto 2024

Heerka sicir-bararka bisha Agoosto 2024 waa isbedelka boqolleyda ee Tusaha sicirka badeecadaha (TSB) 12kii bilood ee la soo dhaafay, Agoosto 2023 iyo Agoosto 2024.

**Dhammaan qeybaha TSB** ayaa sare u kacay 5.93 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay, Agoosto 2023 iyo Agoosto 2024, marka labar bardhigo 5.54 boqolkiiba 12kii bilood, Juulay 2023 iyo Juulay 2024.

**Dhammaan qeybaha TSB isbedelka** billaha ah ee Agoosto 2024 ayaa sameeyey hoos u dhac dhan -1.23 boqolkiiba.

### Guud ahaan heerka sicir bararka: qeybo ka mid ah badeecadaha, Agoosto 2024.


Heerka sicir bararka qeybaha **cuntada iyo cabitaanada** iyo **guryaha, biyaha, korontada iyo gaaska** ayaa ah kuwa ugu saameynta badan badeecadaha oo dhan looguna isticmaalka badan yahay **dhammaan qeybaha TSB-da**.

**Cuntada iyo Cabitaanada** ayaa qiimahooda bilaha ahi hoos u dhacay 2.82 boqolkiiba, bishii Agoosto 2024 marka la barbardhigo sare u kac gaaraya -0.75 boqolkiiba bishii Juulay 2024. Tani ayaa sababtay in qaar ka mid ah cuntada qutul daruuriga ah uu qiimahoodu sare u kaco. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa sare u kacay -1.01 boqolkiiba bishii Agoosto 2024. marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah oo gaaray -1.19 boqolkiiba Juulay 2024.

**Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaaska** ayaa hoos u dhac bille ah sameeyey -0.15 boqolkiiba ee bishii Agoosto 2024. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa sare u kacay 6.89 boqolkiiba Agoosto 2024. Tan ayaa imaanaysa marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah oo gaaray 6.84 boqolkiiba ee Juulay 2024.

### Dhammaan qeybaha TSB-da & qeybaha la xushay

Index = 100 @ December 2014




Isha Xogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Agoosto 2024** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS\_somalia

## A. Qeybaha ugu weyn ee isbedelka Sanadlaha ah (TSB)

Jaantuska 1: Sicir bararka sanadlaha ee dhamaan qeybaha; Agoosto 2024(Dec 2014 = 100)



### Qeybaha ugu weyn ee sicirkooda Kordhay (+):

- **Isgaarsiinta** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah 42.70 boqolkolkiiba bishii Agoosto 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha telefoonka iyo qalabka telefax (+59.44 boqolkiiba).
- **Maqaayadaha & Hoteelada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle 32.24 boqolkiiba bishii Agoosto 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid Hoteelada (+50.11 boqolkiiba).
- **Hawo Bedeleshada & Dhaqanka** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 31.40 boqolkiiba Agoosto 2024. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay qiimaha Maqal & Muuqal, Sawir iyo Macluumaadka oo u gaaray (+39.12 boqolkiiba).
- **Alaabaha yaryar & Adeegyada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 23.20 boqolkiiba Agoosto 2024. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay alaabooyinka daryeelka qofka oo qiimahoodu gaaray (+24.34 boqolkiiba).
- **Dharka & Kabaha** ayaa la diiwaan galiyey sare u kac sanadle ah oo dhan 22.62 boqolkiiba Agoosto 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Dharka (+24.76 boqolkiiba), sare u kaca waxaa sababay Dharka caruurta (+95.29 boqolkiiba).
- **Gaadiidka** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 17.66 boqolkiiba Agoosto 2024. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay qiimaha lagu iibsado Gawaarida oo gaaray (+23.59 boqolkiiba).
- **Agabka Guryaha, Qoyska & Dayactirka** ayaa laga diiwaan galiyey sare u kac sanadle ah oo dhan 16.01 boqolkiiba Agoosto 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Dharka Guriga (+20.56 boqolkiiba).
- **Kirada Guryaha & korontada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah 6.89 boqolkolkiiba bishii Agoosto 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha agabka dayactirka iyo hagaajinta guriga (+24.91 boqolkiiba).


War bixin bileedka bisha **Agoosto 2024** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS\_somalia

- **Cafimaadka** ayaa lagu diiwaan geliyey sare u kac sanadle ah 6.62 boqolkiiba, bishii Agoosto 2024. Sare ugu badan ayaa ka dhashay qiimaha Adeega Caafimaadka (+13.65 boqolkiiba).

#### Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu Hoos u dhacay Bishii Agoosto 2024(-)

- **Tubaakada** ayaa la diwaangaliyey hoos u dhac sanadle ah oo gaaraya -12.21 boqolkiib bishii Agoosto 2024. Hoos u dhaca ugu badan ayaa ka yimid tubaakada gaar ahaan sigaarka (-26.15 boqolkiiba).
- **Tacliinta** ayaa sameeyey hoos u dhac sanadle ah -6.15 boqolkiiba bishii Agoosto 2024. Hoos u dhaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Dugsiga Sare kadib Waxbarasho Aan Jaamacad ahayn (-12.60 boqolkiiba).

#### B. Qeybaha ugu waa weyn ee qeybaha kala duwan ee saameeya isbedelka bilaha ah ee TSB –da Jaantuska 2: TSB; Isbedelka Sicirbararka ee bilaha dhamaan qeybaha; Agoosto 2024 (Dec 2014 = 100)



#### Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu kordhay Bisha Agoosto 2024(+)

- **Tacliinta** ayaa sameeyey hoos u dhac Bille ah -5.11 boqolkiiba bishii Agoosto 2024. Hoos u dhaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Dugsiga Sare kadib Waxbarasho Aan Jaamacad ahayn (- 38.42 boqolkiiba).
- **Dharka & Kabaha** ayaa la diiwaan galiyey sare u kac bille ah oo dhan 3.40 boqolkiiba Agoosto 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Dharka (4.15 boqolkiiba), hoos u dhaca waxaa sababay Dharka Caruurta 8.05 boqolkiiba.
- **Qeybaha ugu waaweyn oo sicirkoodu hoos u dhacay(-)**
- **Cuntada & Cabitaanada** ayaa la diwaangaliyey hoos u dhac Bille ah oo gaaraya -2.82 boqolkiiba bishii Agoosto 2024. Hoos u dhaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Cuntada (2.85 boqolkiiba).

## Shaxda 2: Isbedelka tusaha sicirka ee qeybaha badeecadaha Agoosto 2024ee habka (COICOP)

Habka kalasaarida caalamiga ee COICOP	TSB Weight	Agoosto 2023 TSB	Juulay 2024 TSB	Agoosto 2024 TSB	% Boqolkii ba Bishan iyo Bishii hore	% Boqolkiiba Isbedelka Sanadkii Hore iyo Sanadkaan
<b>Dhamaan Qeybaha Tsb</b>	<b>100.00</b>	<b>142.58</b>	<b>152.92</b>	<b>151.04</b>	<b>-1.23</b>	<b>5.93</b>
Cuntada & Cabitaanada	46.04	145.60	148.32	144.14	-2.82	-1.01
Tubaakadda	1.25	167.33	146.90	146.90	0.00	-12.21
Dharka & Kabaha	5.03	168.72	200.08	206.87	3.40	22.62
Guryaha, Biyaha, Korontada, Gaaska & Shidaalka Kale	23.41	138.95	148.75	148.53	-0.15	6.89
Agabka Guryaha	2.93	116.56	134.60	135.22	0.46	16.01
Caafimaadka	5.00	178.18	190.90	189.97	-0.49	6.62
Gaadiidka	3.77	121.29	142.72	142.72	0.00	17.66
Isgaarsiinta	2.80	129.05	184.16	184.16	0.00	42.70
Hawo Bedeleshada & Dhaqanka	1.00	104.30	137.25	137.05	-0.15	31.40
Tacliinta	4.00	116.95	115.66	109.75	-5.11	-6.15
Maqaayadaha & Hoteelada	2.00	145.78	192.79	192.79	0.00	32.24
Alaabaha Yaryar & Adeegyada	2.77	118.80	145.48	146.36	0.61	23.20

### Ogeysiis:

Tusaha Sicirka Badeecadaha waa sahan ku saabsan badeecadaha iyo adeegyada ay isticmaalaan qoysaska caadiga ah. Xogta sahanka waxaa la soo ururiyaa Todobaadka koowaad iyo kan sedexaad ee bilkasta. Sicirka badeecadaha iyo adeegyada waxaa laga soo ururiyaa goobaha ganacsiga ee afarta suuq ee ugu waa weyn Magaaladda Muqdisho.


### Soosaarida tan xigta

Tixraaca Sicirka Badeecadaha (TSB), Sebteembar, 2024 waxaa la baahin doonaa 15 Oktoobar, 2024. Wixii faahfaahin intaasi dheer ee ku saabsan (TSB) iyo xogaha kale ee rasmiga kala soco Xafiiska Istaatistiskada, Fadlan booqo Bogeena rasmiga ah ee <http://www.nbs.gov.so>

**Lifaaqa 1aad: Dhammaan Qeybaha 'TBS' – qeybaha ka qeyb qaata heerka sicir-bararka bishii Agoosto 2024 marka loo eego COICOPka**

**Dhamaan qeybaha TSB-da**

Qeybaha ka qeybqaata (%) heerka sicir bararka (COICOP)



Isha Xogta: NBS

**Lifaaqa 1aad** wuxuu bixiyaa falanqeyn kusaabsan heerka sicir bararka ee Bishsa oo loo qeybiyey iyo is barbardhiga qeybaha, ayada oo loo eegayo qeybaha COICOP loona soo bandhigayo sida ay u kalasaameyn badan yihiin (ka qeyb qaadashadooda) dhamaan qeybahaha 'TSB' ka.

War bixin bileedka bisha **Agoosto 2024** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS\_somalia